

Cusboonaysiinta Shatiga Daryeelka Carruurta Qoyska Provider Hub ee Xiliga Gu'ga 2026

Fariintan waxaa loo diray dadka haysta shatiga daryeelka carruurta qoyska ee Minnesota, iyadoo la xiriirta bilaabista shatiga daryeelka carruurta qoyska (family child care licensing) ee Provider Hub.

Gobolka Minnesota wuxuu sii wadaa horumarinta diyaarinta shatiga daryeelka carruurta qoyska ee Provider Hub. Waxaan ka go'an nahay inaan idinla wadaagno macluumaad marka ay diyaar noqdaan. Dayrtii hore, waxaan ku dhawaaqay nidaamka bilaabista oo heer gobol (regional) loo kala qaabeeyey. Cusboonaysiintan xiliga gu'ga, waxaan idinla wadaageynaa war ku saabsan **waqtiga jadwalka**.

Macluumaad Cusub: Taariikhda bilowga lama Go'aamin Inta lagu jiro Fadhiga Sharci-dejinta 2026

Hadda, Golaha Sharci-dejinta Minnesota (Minnesota Legislature) waxayu ku jiraan bartamaha kalfadhiga sharci-dejinta ee 2026. Ka hor inta aan la bilaabin shatiga daryeelka carruurta qoyska ee Provider Hub, waxaan u baahanahay inaan fahanno isbeddellada, haddii ay jiraan, ee sharci-dejintu ay samayn doonto heerarka shatiga daryeelka carruurta qoyska. Isbeddel kasta oo dhaca waxay u badan tahay in lagu daro Provider Hub.

Sidaas darteed, go'aan lagama gaari doono goorta la bilaabay shatiga daryeelka carruurta qoyska ee Provider Hub ka hor dhammaadka kalfadhiga sharci-dejinta ee 2026.

Cusboonaysiin ayaa la bixin doonaa marka kalfadhiga sharci-dejintu dhammaado, lana qiimeeyo saameynta isbeddellada dhici kara.

Macluumaad Hore Ioo Wadaagay

Waxaad dib u eegi kartaa [cusboonaysiintii hore ee Provider Hub ee la iimayl gareeyey Nov. 10.](#)

Waa Maxay Provider Hub

Provider Hub waa aalad khadka tooska ah oo loogu talagalay bixiyeyaasha si ay uga codsadaan una maareeyaan shatiyada adeegyada bulshada, fursadaha maalgelinta, iyo ka qaybgalka barnaamijyada kale ee dawladda.

Maanta, xarumaha daryeelka carruurta ee leh shati iyo shahaado waxay Provider Hub u adeegsadaan:

- Shatiga / shahaado-siinta xarumaha daryeelka carruurta
- Maareynta diiwaangelinta bixiyeyaasha ee Child Care Assistance Program (CCAP)
- Ka qaybgalka barnaamijka Great Start ee Lacagta Taageerada Magdhowga
- Isqorista iyo xaadirinta

Bishii Agoosto 2025, **bixiyeyaasha daryeelka carruurta qoyska** waxay heleen [gelitaanka Provider Hub si ay u maareeyaan diiwaangelintooda barnaamijka Child Care Assistance.](#)

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan aaladdan khadka tooska ah waxaad ka heli kartaa bogga [Provider Hub.](#)

Nala Soo Xiriir

Haddii aad qabto su'aalo ama aad rabto inaad nala wadaagto aragti, fadlan iimayl u dir kooxda Provider Hub: providerhub@state.mn.us.

Waad ku mahadsan tihiiin dhammaan shaqada aad u qabataan daryeelka carruurta iyo guud ahaan qoysaska Minnesota!